

Hada Waxaad ku sugan tahay Maxkamada Dhalinyarada...

...Waa muhiin inaad fahanto habka ay u fusho!

HABKA LOOMARO

Waxaad ku sugan tahay maxkamada dhalinyarada sababtoo ah Commonwealth of Massachusetts, oo uu ka socdo Lajirka Qareenka Degmada - denbi ku soo oogaha- waxaana laguugu eedeyey danbi.

Talaabada kowaad: Waxaa lagu diyaarinayaa dacwad (taas macnaheedu yahay in laguugu eedeyey danbi).

- **Xeerilaaliyuhu** wuxuu u sheegayaa garsooraha danbiga laguugu soo eedeyey isaga oo tixraacaya qoraalka booliska.
- **Gudoomiyaha oogista (P.O)** wuxuu u sheegayaa garsooraha sidaad ku tahay guriga iyo iskuulka .Gudoomiyuhu wuxuu eegayaa inaad wax denbi ah hore u gashey uu kaa yaalo. Taas waxay kaa cawinaysaa in si aqlaaq iyo caawimid ku jirto ula shaqeyso P.O. Waxaa kale oo u sheegayaa waxkasta ood ku hadasho, sidaas darteed ha kala hadlin danbiga laguugu soo oogay. Hana kala lahadlin qof aan aheyn qareenkaaga (abukaatahaaga) dacwadaada.
- **Qareenkaagu (abukaatahaagu)** wuxuu wakiil ka yahay inuu kuu hadlo, wuxuuna u sheegayaa maxkamada dhamaan wanaagaaga oo ah -in aad iskuulka si joogto ah u tagto-in aad ka qeyb qaadato barnaamijiyada iskuulka kadib, in aad laheyn danbi aad hore u gashey.
- **Garsooruhu** wuxuu dhageysanayaa ficilada booliskaa uu yiri waad ku kacday oo kamid ah oogista iyo doodaha qareenkaaga, kadibna wuxuu go'aaminayaa hadii aad guriga iska aadi laheed ama **damaanad** in la dhigo hadba midkey noqoto. Hadii garsooru go'aamiyo damaano wax lacag ah kuma xirna, adigana waxaad tageeysaa Qeybta Arimaha Dhalinyarada (**DYS**) inta ay dacwadu socoto.

Ogsoonow -Qareenkaaga waa kan kaliya eed kala hali karto dacwadaada iyo wax kasta oo ku saabsan danbiga laguugu soo oogay. Wax kasta ood u sheegto qareenkaaga waa wax idiin qarsoon. Hadaba qareenkaagu waxaa uu si wacan kuu cawimi karaa markaad si dadaal ku jiro ula shaqeyso.

Talaabada Labaad: Guriga ama **DYS** (Qeybta Arimaha Dhalinyarada)

Hadii lagu diro guriga diyaarinta maxkamada ka dib:

- Kula kulan qareenkaaga sida ugu dhaqsaha badan si uu kuu cawiyo kuuna difaaco. Dadaalkaaga la'aantii qareenkaagu kuuma qaban karo hawl wanaagsan.
- **Hakala hadlin** dacwadaada qof aan aheyn qareenkaaga-xitaa macalimiinta, waalidka ama booliska. Hadii ay taa dhacdo xeer ilaaliyuhu waxa uu kuu adeegsanayaa ereyadaas.
- Waa in aadan weeydiinin saaxiibadada iney lahadlaan **marqaatiyada** (oranaya waxaad ku kacday ficil sharci daro ah) danbi baadna ku gali kartaa u hanjabida marqaatiyada.
- Tag iskuulka ama shaqada maalin walba waqtigii loogu talo galay, hana ku kicin wax xadgudub ah hadii kale garsooruhu waxaa uu ku oronkaraa waa inaad tagto Qeybta arimaha dhalinyarada **DYS** inteeey dacwadu sii soconeeeyso.
- Ilaali ciqaabta kuu degsan ! Taas oo ah in maxkamadu kuu soo dirto boolis kormeer ah.

Hadii lagu diro **DYS diyaarinta dacwada kadib:**

- Waxaad xaq uleedahay **damaano abiiil** ah. Taas oo macnaheedu yahay in garsooraha ka socda maxkamada sare uu dhageysan doono dacwadaada ka gaarayo go'aan in abiiilkaagu jid lee yahay. Waa inaad wacdo qareenkaaga una sheegto inaad rabto damaanad abiiil ah. Una sheeg qareenkaagu in uu kuu yimaado.
- Ha galin wax dagaalaan ah ama xadgudub intaatku sugan tahay **DYS**. Qoraalka wanaagsan ee kasoo baxaa wuxuu tageerayaa dacwadaada. Qoraalka xunse wuxuu dhawacayaa dacwadaada.
- Wac qareenkaaga lana hadal.